Hagaha taageerada ee loogu talaggalay qofka la kulmay midabtakoorka ama cunsuriyadda

Waddooyinka loo maraayo xal u helidda xaaladaha midabtakoorka ama cunsuriyadda

Qeexid kooban oo ku saabsan midabtakoorka ama cunsuriyadda

Ereyga midabtakoor ama cunsuriyadda *(rasismi)* waa fikir ku salaysan in koox dad ah si gaar ah loogu qiimeeyo ama lagu takooro asalkooda qowmiyadeed, midabka jirka, jinsiyadda, dhaqanka, afka hooyo ama diinta dartood, iyadoo loo tixggelinaayo in ay ka hooseeyaan ama ka liitaan kooxaha kale ee dadka. Midabtakoorka ama cunsuriyadda waxa inta badan la xiriira fikirka ah in qofku uu u arko in kooxdiisu ay ka fiican tahay kooxaha kale.

Xigashooyin:
Waa maxay midabtakoorka ama cunsuriyadda?
Liiska ama qaamuuska ereyada kahortagga cunsuriyadda.

Caawimaadda iyo taageerda ku saabsan sida loo aqoonsado midabtakoorka ama cunsiriyadda:

Cinwaanka internetka:
Wakiilka sinnaanta iyo caddaaladda: Sababaha takoorka.

Fahfaahinta dheeraadka ah ee ku saabsan noocyada kala duwan ee midabtakoorka ama cunsuriyadda:

Cinwaanka internetka:
Wakiilka sinnaanta iyo caddaaladda: Midabtakoorka ama cunsuriyadda.

Soo saarista qoraalka hagistaan waxaa ka qaybqaatay ururrada kala ah:
- Rovalan Setlementti ry (Rovala-Opisto, Monikulttuurikeskus MoniNet iyo Rovaniemen, Ranuan ja Posion sovittelutoimisto, Rikosuhripäivystys)
- SPR Lapin piiri (Laanta ururka Laanqayrta cas ee Finland ee gobolka Lapland)
- Mister's ry Monikulttuurinen miesten kerho (Naadiga ragga dhaqammada kala duwan ee ururka Mister's ry)
- Rovalan Nuoret ry – Poikien talo (Guriga wiilasha)
- Magaalada Rovaniemi (Rovaniemen kaupunki) – Mashruuca caalamiga ah ee Rovaniemi (International Rovaniemi -hanke (ESR+)
- MIELI Rovaniemen seudun mielenterveys ry – Rovaniemen Neuvokas (Adeegga tala bixinta iyo taageerada ee Rovaniemi)
- Magaalada Kemi-shaqada qaxootiga (Kemin kaupunki – Pakolaistyö)
- MLL Lapin piiri
- Saldhigga booliska ee Lapi (Lapin poliisilaitos) – Waxqabadka kahortagga ah (Ennalta estävä toiminta)

Xaggee ayaa cunsuriyadda ama midbatakoorku ka dhici karaa?

Xaaladaha dano dhamaysiga iyo adeegyada macaamiisha

Goobaha guud ee dadweynaha u furan

Baraha bulshada, madadaalada iyo ciyaaraha elegtorooniga ah

Goobaha go'aan qaadashada arrimaha siyaasadeed iyo doodaha furan ee dadweynaha

Goobaha waxbarashada

Goobaha shaqada

Hawlaha la xiriira hiwaayadda iyo wakhtiyada firaaqaha

Xaaladaha dano dhamaysiga iyo adeegyada macaamiisha



1

Sheeg waaya-aragnimadaada iyo wixii ku soo maray.

Haddii qof uu si aan habboonayn kuula dhaqmo, u sheeg qofkaas khaladka uu sameeyay iyo sida aan wanaaganayn ee uu kuula dhaqmaayo.

2

Ka codso qofka in uu joojiyo waxa uu samaynaayo.

3



Adiga waa in aad is dejisaa.

Waxa aad dareemi kartaa xanaaq ama murugo, laakiin xasilloonidu waxaa ay kaa caawineysaa in aad si cad oo wax ku ool ah u dhaqanto.

4



U sheeg qofka mas'uulka ah wixii dhacay.

Haddii hab la dhaqanka aan wanaagsanayn uu sii socdo, waxa aad codsataa in aad la kulanto qofka mas'uulka ah, si aad ugala hadasho wixii dhacay.

5

Haddii arrinka aan wax xal ah laga gaarin, waxa aad la xiriiri kartaa:

- Guddiga caddaaladda iyo sinnaanta bulshada
- Wakiilka sinnaanta iyo caddaaladda
- Mas'uulka arrimaha bukaanka
- Mas'uulka arrimaha bulshada
- Xarunta horumarinta iyo maal-gelinta arrimaha degaanka (ARA)
- Barta hagista maalgelinta ama caymiska
- Sidoo kale waxaad caddayn ama warbixin rasmi ah ka codsan kartaa, hay'adda ama shirkadda ay shaqalaheedu sida xun kuula dhaqameen.

6

Haddii loo baahdo waxa aad la xiriiri kartaa booliska.

`poliisi.fi/tee-rikosilmoitus`

Arrimaha ku saabsan faldambi-yeedka, waxa aad wargelinta ama dacwada dambigaas u gudbin kartaa booliska. Haddii aad u baahato waxaa arrinkaas sii wadistiisa kaa caawin kara ururka heeganka adeegga dhibbanayaasha dambiga.

Goobaha guud ee dadweynaha u furan

Xigasho:
[Laanqeyrta Cas ee Finland: Sidaan soo socota samee, haddii aad la kulanto cunsiriyad ama midabtakoor.]

1



Is deji.

Waxa aad dareemi kartaa xanaaq ama murugo, laakiin xasilloonidu waxaa ay kaa caawineysaa in aad si cad oo wax ku ool ah u dhaqanto.

2

Caawimaad iyo taageero ka codso dadka kale ee goobta jooga.

Haddii xaaladdu ay tahay mid khatar ah, waxa aad wacdaa 112. Xusuusnoow mar walba ammaanka shakhsiyadeed.

3

Jooji xaaladda.

Jooji xaaladda, adiga oo si deggan ama xasillooni leh ugu sheegaaya, in ay tahay in uu joojiyo waxa uu samaynaayo.

4

Sax oo wax ka beddel sheegashada ku salaysan midabtakoorka ama cunsuriyadda.

Haddii aad maqasho hadallo ku salaysan midabtakoor ama cunsuriyad, si deggan oo xushmad leh ayaad u sixi kartaa hadalladaas, ama waad su'aal gelin kartaa, adigoo weydiinaaya, sababta uu sidaas u leeyahay.

5

Istaag agtiisa.

Haddii aadan doonayn in aad hadasho, u tag oo ag istaag qofka lagu samaynaayo midabtakoorka ama cunsuriyadda, oo u fidi taageero ama caawimaad.

6

U muuji caadifad ama in aad dareenkiisa la wadaagayso.

La hadal qofka midabtakoorka ama cunsuriyadda la kulmay, oo u muuji naxariis iyo in aad dareenkiisa la wadaagayso.

7

Haddii loo baahdo waxa aad la xiriirtaa booliska.

Marna ha oggolaan aflagaaddo iyo cay. Cayda ama magac xumaynta waxaa ay noqon kartaa fal dambiyeed la isku ciqaabi karo (sharaf dhac ama maamuusjabin). Arrinkaas waxaa aad ka samayn kartaa wargelin dambi oo aad u gudbiso booliska.

Baraha bulshada, madadaalada iyo ciyaaraha elegtorooniga ah

Waxaad booliska siin kartaa wargelin dhanka internetka ah.

Cinwaanka internetka: Bogga internetka ee aad booliska ugu warrami kartid.

Xigasho:
Hadallada nacaybka ee baraha bulshada – Taageero loogu talaggalay shaqaalaha dowladda marka ay la kulmaan xaaladaha ku saabsan hadallada nacaybka ah ee baraha bulshada.

1

Ha u falcelin si xanaaq leh.

Isku day in aad u hadasho si edeb leh oo xasilloon. Waxa kale oo aad dooran kartaa in aadan jawaabin.

2

Kaydi caddaymaha.

Islamarkiiba kaydi farriimaha, sawirrada iyo wixii kale ee adiga lagugu dhibaayo. Sawirro ka reeb oo waxaad ku qaaddaa kaamerada telefoonkaaga *(kuvakaappaus)*, qoraalka ama farriinta laguugu xadgudbay, akoonka *(profiili)* qofka qoray, iyo linkiga cinwaanka bogga internetka ee uu qoraalku ku jiro.

3



Waxaad sheegtaa oo cabasho ka gudbisaa qoraaga.

U gudbi cabasho maamulka bogga internetka, ciyaarta ama barta uu qofkaas isticmaalo.

4



Iska xannib ama iska jooji *(blokkaa eli estä)* qofka qoraalka sameeyay.

5

Caawimaad raadso.

La hadal qof aad ku kalsoon tahay ama qof arrinkaan khibrad u leh.

6 Haddii loo baahdo waxa aad la xiriiri kartaa booliska.

Arrimaha ku saabsan faldambiyeedka, waxa aad wargelinta ama dacwada dambigaas u gudbin kartaa booliska. Haddii aad u baahato waxaa arrinkaas sii wadistiisa kaa caawin kara ururka heeganka adeegga dhibbanayaasha dambiga.



Sidoo kale waxa aad dhanka internetka ugu warrami kartaa booliska. Wargelinta dhanka internetka ah ma ahan wargelin dambiyadeed.

Goobaha go’aan qaadashada arrimaha siyaasadeed iyo doodaha furan ee dadweynaha

U kuurgal oo la soco ololaha ka dhanka ah cunsuriyadda ee ay waddo Laanqeyrta Cas ee Finland.

Cinwaanka internetka: [Laanqeyrta cas ee Finland: Rasisminvastainen viikko.]

1



Is deji.

Degganaantu waxaa ay kaa caawinaysaa in aad wax u qabto si cad oo wax ku ool ah.

2

Caawimaad raadso.

Arrinka waxa aad kala hadashaa dadka aad ku kalsoon tahay, sidoo kale waxa aad ka dalbataa caawimaad. In aad si wadajir ah wax u qabataan waxaa ay noqon kartaa mid wax ku ool ah.

3



Sax oo wax ka beddel sheegasho-oyinka cunsuriyadda ah.

Haddii aad maqasho hadallo ku salayan midabtakoor ama cunsuriyad, si deggan oo xushmad leh ayaad u sixi kartaa hadalladaas, ama waad su'aal gelin kartaa, adigoo weydiinaaya, sababta uu sidaas u leeyahay.

4

Ka qaybqaado hawlaha looga soo horjeeddo cunsuriyadda ama midabtakoorka.

Waxa aad ku biiri kartaa ururrada ama kooxaha ka shaqeeya la dagaal-lanka cunsuriyadda iyo horumarinta sinnaanta iyo caddaaladda.

5 **Saameyn ku yeelo doodaha dadweynaha:**

1. Warbaahinta iyo barnaamijyada doodda: Ka qaybgal ama soo jeedi mowduucyada ku saabsan cunsu-riyadda ama sinnaanta, si loogaga hadlo barnaamijyada warbaahinta.

2. Kulammada ama munaasabadaha doodda: Qabanqaabi kulan dood ah tusaale ahaan goobtaada shaqada, ama codso in hay'ad khibrad leh ay kulankaas soo agaasinto.

3. Soo jeedinta ama mooshinka dadweynaha *(kansalaisaloite)*: Waxa aad ku dadaali kartaa isbeddello dhanka sharciga ah, adigoo samay-naaya soo jeedin ama mooshin dhanka dadweynaha ah.

4. Qoraallada ra'yiga *(mielipide-kirjoitus)*: Qor aragtiyada ku saabsan ra'yigaaga, una dir madaxda ama hay'adaha go'aanka gaara.

6

Cabasho ka gudbi hawlwadeenka ama mas'uulka dowladda.

Waxaad cabasho ka gudbin kartaa habdhaqanka mas'uulka ama hawlwadeenka dowladda, adigoo la xiriiraaya xafiiska maamulka gobolka *(aluehallintovirasto)*.

7 **Haddii loo baahdo waxa aad la xiriiri kartaa booliska.**

Arrimaha ku saabsan faldambi-yeedka, waxa aad wargelinta ama dacwada dambigaas u gudbin ka-taa booliska. Haddii aad u baahato waxaa arrinkaas sii wadistiisa kaa caawin kara ururka heeganka adeegga dhibbanayaasha dambiga.

Goobaha waxbarashada



1



Qofka ka codso inuu joojiyo.

Haddii qof uu kuula dhaqmo si aan habboonayn, u sheeg in ficilkiisu khaldan yahay, kana codso in uu joojiyo waxa uu samaynaayo.

2

Kaydi caddaymaha.

Islamarkiiba kaydi farriimaha, sawirrada iyo wixii kale ee adiga lagugu dhibaayo. Qor wixii dhacay, goorta ay dhaceen iyo cidda ku lug lahayd.

3 U sheeg shaqaalaha.

La hadal tusaale ahaan: macallinka, hagaha, kuraatoriga (mas'uulka arrimaha bulshada ee iskuulka), kalkaalisada caafimaadka, maamulaha ama qofka qaabilsan arrimaha qashqashaadda ama xadgudubyada ee ka dhaca iskuulka. Waxaa sidoo kale iskuulku uu yeelan karaa in hab qarsoodi ah (oo aan wax magac ah la sheegeyn) aad ugu gudbin karto cabashadaada. Haddii aad tahay ilmo aan weli qaan gaarin, waxaa aad sidoo kale u sheegi kartaa waalidkaaga ama qof weyn oo aad ku kalsoon tahay. Isku day inaad si faahfaahsan u sheegto waxa dhacay, goorma ayey dhaceen, iyo halka ay wax ka dhaceen.

4



Baar oo wax ka ogoow nidaamka habraaca ee iskuulka.

Baar oo wax ka ogoow haddii iskuulku leeyahay hagis ama nidaam cad *(toimintamalli)* oo wax looga qabanaayo xaaladaha noocaan oo kale ah.

5

Raadso caawimaadda la xiriirta wax ka qabashada arrinkaan.

Haddii aad u baahato waxa aad la xiriiri kartaa:

- Xarunta dhexdhexaadinta khilaafaadka
- Adeegga daryeelka dhibbanayaasha dambiyada (RIKU)
- Wakiilka sinnaanta iyo caddaaladda *(Yhdenvertaisuusvaltuutettu)*
- Wakiilka sinnaanta bulshada *(Tasa-arvovaltuutettu)*
- Xafiiska maamulka gobolka *(Aluehallintovirasto – AVI)*

Marka xaaladda la baaraayo, waa in ay goobjoog ka yihiin dadka mas'uulka ah iyo dhammaan cidda arrinku khuseeyo.

6

La soco horumarka arrinku samaynaayo iyo xalka laga gaaraayo.

7 Haddii loo baahdo waxa aad la xiriiri kartaa booliska.

Arrimaha ku saabsan faldambi-yeedka, waxa aad wargelinta ama dacwada dambigaas u gudbin kataa booliska. Haddii aad u baahato waxaa arrinkaas sii wadistiisa kaa caawin kara ururka heeganka adeegga dhibbanayaasha dambiga.

Goobta shaqada



Xigasho:
Xafiiska maamulka gobolka (Aluehallintovirasto, 2024).
Työsuojelu (2024).
Ammattiliitto Pro (2024).

1



Qofka ka codso inuu joojiyo.

Haddii qof uu kuula dhaqmo si aan habboonayn, u sheeg in ficilkiisu khaldan yahay, kana codso in uu joojiyo waxa uu samaynaayo.

2

Kaydi caddaymaha.

Islamarkiiba kaydi farriimaha, sawirrada iyo wixii kale ee adiga lagugu dhibaayo. Qor wixii dhacay, goorta ay dhaceen iyo cidda ku lug lahayd.

3



U sheeg shaqaalaha.

Haddii habdhaqanka qofku uusan isbeddelin, la xiriir mas'uulka shaqaalaha. Haddii qofka mas'uulka ah uu si khalad ah u dhaqmo, waxa aad la xiriirtaa maamulaha ka sarreeya isaga/iyada.

4



Baar oo wax ka ogoow nidaamka habraaca ee goobta shaqada.

Baar oo wax ka ogoow haddii goobta shaqadu ay leedahay hagis ama nidaam cad *(toiminta-malli)* oo wax looga qabanaayo habdhaqanka aan habboonayn iyo qashqashaadda ama xadgudubka.

5 Raadso caawimaadda la xiriirta wax ka qabashada arrinkaan.

- Waxa aad caawimaad weydiisan kartaa wakiilka shaqaalaha ee goobta shaqada, wakiilka ammaanka ee goobta shaqada ama daryeelka caafimaadka shaqaalaha.
- Haddii aad xubin ka tahay, waxa aad talo weydiisan kartaa ururkaaga shaqaalaha
- Sidoo kale waxa aad la xiriiri kartaa tusaale ahaan wakiilka sinnaanta bulshada *(Tasa-arvovaltuutettu)*, wakiilka sinnaanta iyo caddaaladda *(Yhdenvertaisuusvaltuutettu)*, ama xafiiska maamulka gobolka *(Aluehallintovirasto – AVI)*.

6

La soco horumarka arrinku samaynaayo iyo xalka laga gaaraayo.

Haddii loo baahdo, waxa aad hagis dheeraad ah oo arrinkaan ku saabsan ka heli kartaa, in aad wacdo lambarka adeegga talosiinta ee wakiilka ammaanka ee goobta shaqada.

7 Haddii loo baahdo waxa aad la xiriiri kartaa booliska.

Arrimaha ku saabsan faldambiyeedka, waxa aad wargelinta ama dacwada dambigaas u gudbin kataa booliska. Haddii aad u baahato waxaa arrinkaas sii wadistiisa kaa caawin kara ururka heeganka adeegga dhibbanayaasha dambiga.

Hawlaha la xiriira hiwaaya-daha iyo wakhtiyada firaaqaha

Xigasho:
Laanqeyrta Cas ee Finland: Sidaan soo socota samee, haddii aad la kulanto cunsiriyad ama midabtakoor.

1

U sheeg si cad in wax khaldan ay socdaan, oo ha aamusin

Haddii qof uu kuula dhaqmo si aan habboonayn, u sheeg in ficilkiisu khaldan yahay, kana codso in uu joojiyo waxa uu samaynaayo. Caawimaad waydiiso dadka kale ee goobta jooga. Is deji oo fiiro gaar ah u yeelo ammaanka. Haddii xaaladdu noqoto mid halis ah, wac lambarka xaaladaha degdegga ama emerjensiga ah ee 112.

2

Kaydi caddaymaha.

Islamarkiiba kaydi farriimaha, sawirrada iyo wixii kale ee adiga lagugu dhibaayo. Qor wixii dhacay, goorta ay dhaceen iyo cidda ku lug lahayd.

3

Sida wax u dhaceen u sheeg qofka mas'uulka ah.

Waxa aad u sheegtaa tusaale ahaan hagaha hiwaayadda, tababaraha ama qofkii kale ee mas'uulka ah. Haddii loo baahdo waxa aad sidoo kale caawimaad weydiisataa waalidka, saaxiibbada ama dadka kale ee waaweyn ee aad ku kalsoon tahay.

4



Isticmaal kannaallada ururka hiwaayadda.

Baar haddii ururka ama kooxda hiwaayaddu ay leeyihiin nidaam ama habraac gaar ah oo wax looga qabto dhacdooyinka takoorka ama xadgudubka.

5

Caawimaad raadso.

Waxa aad arrinka kala sheekeysataa ehelkaaaga, saaxiibbada aad ku kalsoon tahay, ama adeegyada taageerada, sida Heeganka dhibbanaha dambiga *(Rikosuhripäivystys, RIKU)* ama wakiilka sinnaanta iyo caddaaladda.

6

poliisi.fi/tee-rikosilmoitus

Haddii loo baahdo waxa aad la xiriiri kartaa booliska.

Arrimaha ku saabsan faldambiyeedka, waxa aad wargelinta ama dacwada dambigaas u gudbin kartaa booliska. Haddii aad u baahato waxaa arrinkaas sii wadistiisa kaa caawin kara ururka heeganka adeegga dhibbanayaasha dambiga.

Hay’adaha kale ee arrinkaan wax ka qaban kara

Xigasho:
Wakiilka sinnaanta iyo caddaaladda: Aniga miyaa la i takooray? Hay’adaha kale.

Wakiilka sinnaanta bulshada

Haddii aad ka shakisan tahay in lagugu takooray sababo la xiriira jinsigaaga, aqoonsigaaga jinsiyeed, sida aad u muujiso jinsigaaga, uurka, waajibaadka waalidnimo, ama waajibaadkaaga daryeelka qoyska, hay’adda awoodda u leh in ay arrintan qiimayso waa wakiilka sinnaanta bulshada *(Tasa-arvovaltuutettu)*. Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heli kartaa bogga internetka ee wakiilka sinnaanta bulshada.

Xafiiska maamulka gobolka (AVI)

Xafiiska maamulka gobolka *(Aluehallintovirasto – AVI)* wuxuu ka shaqeeyaa arrimo badan oo la xiriira, cabashooyinka ku saabsan waxbarashada iyo daryeelka waxbarashada hore ee carruurta *(varhaiskasvatus)*, iyo codsiyada dib u eegista *(oikaisuvaatimus)*, warbixinnada rasmiga ah iyo codsiyada sixidda qiimaynta ardayda *(oppilasarvioinnin oikaisupyyntö)*. Tusaale ahaan, sixidda go’aanka la xiriira iskuul u aqbalidda ardayga, waxaa codsigaas loo diraa xafiiska maamulka gobolka. Sidoo kale, AVI waxaa ay hagtaa oo ilaalisaa adeegyada bulshada ee degmooyinka iyo kuwa shirkadaha gaarka ah, iyo adeegyada caafimaadka ee dadweynaha ee degmooyinka iyo kuwa shirkadaha gaarka ah. Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heli kartaa bogga internetka ee xafiiska maamulka gobolka.

Guddiga caddaaladda iyo sinnaanta bulshada

Guddiga caddaaladda iyo sinnaanta bulshada *(Yhdenvertaisuus- ja tasa-arvolautakunta)* waa waax madaxbannaan oo aan hoos tagin cid kale, waxaana loo sameeyay in ay dadka siiso ilaalinta sharciga ah, haddii ay dareemaan in la takooray. Guddiga caddaaladda iyo sinnaanta bulshada waxaa uu si sharci ah u caddeyn karaa in xaaladdu jabinayso mamnuucista takoorka ee ku xusan sharciga sinnaanta iyo caddaaladda, waxaana go’aannadoodu noqon karaan sharci ahaan kuwo waajib ah. Ka baaraandegista arrinta guddiga dhexdiisa waa bilaash (lacag la’aan). Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan shaqada guddiga waxaad ka heli kartaa bogga internetka ee guddiga.

Wakiilka arrimaha bukaanka
Haddii aadan ku qanacsanayn daryeel-ka caafimaad ee laguu sameeyay, ama aad dareentay in si aan habboonayn laguula dhaqmay xarunta caafimaadka dhexdeeda, waxa aad la xiriiri kartaa wakiilka arrimaha bukaanka *(potilasasiavastaava)*. Wakiilka arrimaha bukaanka wuxuu mas'uul ka yahay in uu bixiyo talooyin iyo faahfaahin ku saabsan xaaladda iyo xuquuqda bukaanka. Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heli kartaa bogga internetka ee Valvira (hay'adda kormeerka adeegyada caafimaadka).

Wakiilka arrimaha bulshada ama sooshaalka
Haddii aadan ku qanacsanayn sida laguula dhaqmay ama adeegyada aad ka heshay xafiiska daryeelka arrimaha bulshada, waxaad la xiriiri kartaa wakiilka arrimaha bulshada *(sosiaaliasiavastaava)*.Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heli kartaa bogga Valvira (hay'adda kormeerka adeegyada caafimaadka iyo bulshada).

Xarunta maalgelinta iyo horumarinta guryaha (ARA)
Xarunta maalgelinta iyo horumarinta guryaha (ARA) waxaa ay ilaalisaa isticmaalka guryaha kirada ah ee ARA, waxaa ay hubisaa in la raacay shuruucda la xiriirta xulashada dadka degaaya guryahaas iyo in nidaamkaas lagu xulay uu yahay mid si siman loogu sameeyay dadka, oo aan cidna lagu takoorin arrinkaas, sidoo kale waxaa xaruntu ay ilaalisaa arrimaha la xiriira in xadaynta qiimaha kirada si caddaalad ah loo go'aamiyay iyo inkale.

La talinta caymiska iyo maaliyadda
La talinta caymiska iyo maaliyadda (FINE) waxaa ay ka caawisaa macaamiisha, dhibaatooyinka la xiriira arrimaha ay ka midka yihiin caymisyada (sida caymiska guriga), iyo arrimaha bangiyada.
Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heli kartaa bogga internetka ee FINE.

Ka codsashada faahfaahinta ama sharaxaadda tooska ah ee hay'adda arrintu khusayso.
Xaaladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa in ay ku habboon tahay in qofka laftigiisa uu si toos ah qoraal jawaab ah uga codsado cidda lagu tuhunsan yahay in uu takoorku ka yimid dhankooda, si ay u sharraxaan sababta ay sidaas ugu dhaqmeen. Codsigaas qoraalka ah wuxuu noqon karaa hab degdeg ah oo arrinta lagu xallin karo. Haddii goor dambe loo gudbiyo cabashada arrinkaas xafiiska wakiilka sinnaanta iyo caddaaladda, waxaa jawaabta noocaas oo kale ah ay dedejinaysaa falanqaynta ama wax ka qabashada uu arrinkan ka gaari karo xafiiska wakiilka sinnaanta iyo caddaaladda.

Bogag muhiim ah oo laga helo caawimaad iyo macluumaad

***Rasisminvastainen toiminta* (Waxqabadka ka dhanka ah cunsuriyadda):**

Cinwaanka internetka:
Laanqeyrta cas: Waxqabadka ka dhanka ah cunsuriyadda

***Tee rikosilmoitus poliisille* (Dacwadda ama wargelinta dambiga u gudbi booliska):**

Cinwaanka internetka:
Booliska: Dacwad faldambiyeed.

***Mikä on rasistinen rikos* (Waa maxay dambi cunsuriyadeed)?**

Cinwaanka intertnetka:
Mowduuca RIKU: dambi cunsuriyadeed.

La xiriir xafiiska wakiilka sinnaanta iyo caddaaladda:

Cinwaanka intertnetka:
Wakiilka sinnaanta iyo caddaaladda: Adeegga macmiilka.

***Tietoa viharikoksista* (Dambiyada naceybka ku saleysan):** Poliisi: Viharikokset.

***Verkkokoulutus antirasismista ammattilaisille* (Tababbar dhanka internetka ah oo ku saabsan la dagaallanka cunsuriyadda, looguna talagalay xirfadlayaasha):** Thl.fi: Verkkokoulutus antirasismista ammattilaisille.

Qareenku wuxuu ka jawaabayaa: Noocee ah fal cunsuriyadeed lagu beegsado qofka oo dalkaan Finland gudihiisa lagu xukumi karo xagga dambiyada (sharciga ciqaabta)? Rikosuhripäivystys: Juristi vastaa.

Tusaale aad ka faa'iidaysan karto markaad diyaarinayso hagis (habraac) loogu talaggalay bulshadaada wakhtiyada firaaqada ama kooxda hiwaayadda ee aad ka tirsan tahay: Sivista: Malli menettelytapaohjeiksi syrjintä- ja häirintätapauksissa.

Hgaistaan ku saabsan taageerada dadka la kulma cunsuriyadda waa arrin waxtar leh oo loogu talaggalay dhammaan dadka si toos ah ula kulmay cunsuriyadda, ama kuwa goob joog u ahaa dhacdo cunsuriyadeed, kuwo taageero u ah qof la takoorey, iyo sidoo kale kuwa doonaya in ay horay wax uga sii ogaadaan xogta ku saabsan sida loola tacaalo xaaladaha cunsuriyadeed.

Hagaha wuxuu dadka ku dhiirriggelinayaa in ay si wadajir ah oo ammaan leh uga hortagaan cunsuriyadda. Waxaa hagahaan ku jira talooyin iyo habraacyo cad cad oo ku saabsan sida loola dhaqmo xaaladaha kala duwan ee ay dhici karto in cunsuriyadda lala kulmo. Waxaad ka heli doontaa hagahaan tusaale ahaan, talooyin la xiriira halka aad caawimaad ka heli karto, haddii uu qof kuula dhaqmo si cunsuriyad ama midabatakoor ah, tusaale ahaan goobta shaqada, hiwaayadda ama doodaha furan ee dadweynaha.

Hagaha waxaa si wadajir ah u diyaariyey Rovalan Setlementti ry, Laanqayrta cas ee gobolka Lapland *(Suomen Punainen Risti, Lapin piiri)*, iyo Mister's ry, iyadoo lala kaashanayo xirfadlayaal ka kala socda qaybaha kala duwan ee laamaha shaqada. Hagahaan waxa uu qayb ka yahay qorshe hawleedka heer gobol ee lagula dagaallamaayo cunsuriyadda, islamarkaana kor loogu qaadaayo xiriirka wanaagsan ee ka dhexeeya bulshooyinka kala duwan. Mashruuca waxaa maalgeliyay ururka *Hyvät väestösuhteet -hanke* (Mashruuca xiriirka bulshooyinka wanaagsan).

ROVALA
ROVALA-OPISTO
ROVALA
MONINET
Monikulttuurinen työ

Elinkeino-, liikenne- ja ympäristökeskus

Punainen Risti
Lapin piiri

Euroopan unionin rahoittama

HVS
HANKE HYVIEN VÄESTÖSUHTEIDEN EDISTÄMISEKSI

Monikulttuurinen miesten kerho
Multicultural Men's Club
Mister's RY